

Xeerka Maamulka, ee 21 Abiriil 1960, lamba. 21 diw.

Dhisidda Guddiga daraasaadka, ee xagga ilaalinta keymada ah hantida guud.

WASIIRKA BEERAHA IYO XOOLAHA

MAAMULAHA

Markuu arkay sharciga 7 Maajo 1956, lamba. 1.

Markuu arkay XM, ee 18 Maajo 1956, lamba. 78;

Markuu arkay Amargooyada 12 Abiriil 1956, lamba. 5;

Markuu tixgeliyey baahiga loo qabo in la dhiso hayad ka hawlgasha daraasaadka la xiriira ilaalinta baadiyaha iyo keymahahantiga guud ah, guud ahaan iyo diyaarinta xeerar laga soo saaro maaddadaas (arrintaas);

Markuu dhegeystay golaha Wasiirrada;

Asaga oo ku saleynayo soo-jeedinta Wasiirka Beeraha iyo C. Xoolaha;

WUXUU XEERINAYAA

Qod. 1

Waxaa la dhisayaa Guddiga U-dhexeeya Wasaarado oo muhimmadiisu tahay in uu darso xeerarka lagama maarmaanka u ah ilaalinta, kordhinta qiimeynta baadiyaha iyo keymaha waddanka guud ahaan.

Qod. 2

Guddigaas la soo sheegay waxa uu ka kooban yahay:

- Wasiirka Beeraha iyo Xoolaha oo shir-guddoominaya;
- Madaxa Waaxda Beeraha ama hawlwadeen kale;
- Madaxa Waaxda Xoolaha (Cilmiga Xoolaha) ama hawlwadeen kale;
- Wakiil Wasaaradda Arrimaha Gudaha;
- Wakiil Wasaaradda Caddaaladda;
- Wakiil Wasaaradda Maaliyadda;
- Wakiil Wasaaradda Wershadaha iyo Ganacsiga;
- Wakiil Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Isgaarsiinta;
- Wakiil Ciidanka Boliiska;
- Wakiil ka socda Wasaaradda Beeraha iyo Xoolaha (Cilmiga Beeraha), oo uu soo magacaabay (cayimay) Wasiirka, ayaa qabanaya hawlaha Xoghaye, ee Guddiga;
- Wasiirka Beeraha iyo Xoolaha waxa uu, in uu ka soo qaybgalo kulamada, ku casumi karaa Guddoomiyaha Rugta Ganacsiga, Wershadaha iyo Beeraha.

Qod. 3

Xeer Wasiie, ee dambe, marka la dhegeysto magacaabisyada la xiriira xubnaha kala duwan, ee Guddiga, waxaa lagu sameynayaa magacaabista kuwa uu ka koobmayo Guddiga.

Qod. 4

Xubnaha Guddiga waxa ay leeyihiin lacagta ramsi ah, oo ay xusayaa axkaamta lagu dhaqmo.

Qod. 5

Xeerkan waxa uu dhaqangelayaa maalinta lagu nashriyo Faafinta Rasmiga.

Muqdisho, 21 Abiriil 1960.

Maamulaha
Mario Di Stefano

Wasiirka Kowaad

Cabdullahi Ciise Maxamuud

Wasiirka Beeraha iyo Xannaanada Xoolaha

Salaad Cabdi Maxamuud

Markuu arkay, Diwaangeliyeyna- diw. lamba. 22, Xaashi lamba. 12.

Muqdisho, 5^{ta} Maajo 1960.

Hanti-dhowraha: **Spadaro**